وَأَنَّ ٱللَّهَ قَدْ أَحَاطَ بِكُلِّ شَىْءٍ عِلْمًۢا ﴿١٢﴾

Eebe wax walba karo wax walbana koobay.

Kibir iyo isla weynan, madax adayg iyo xaqoo laga horjeedsado waxay cidhibtiisu noqotaa halaag iyo caddibaad daran, siday la kulmeen Gaaladii saas falay ee horreeyey, haseyeeshee dadka xaqa rumeeyey ee Caqliga leh waa inay aad ugu waana qaataan kuwaas, Eebana ka dhawrsadaan, illeen waa ka quraanka u soo dejiyey'Rasuulna u soo direy, mugdigana ka saaray'nuurna u bixiyee, si markaas wanaag iyo Janno loogu abaal mariyo, maxaa yeelay Eebe waa kan awoodda leh'wax walbana abuuray wax walbana Cilmigiisu koobay.
Ruuxii dulmiya taako Dhul ah waxaa Madaxa loogaliyaa Todobada Dhul. Waa Saxiix. Adh-Dhalaaq (8-12).

# Suurat At-Taxriim سورة التحريم

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ لِمَ تُحَرِّمُ مَآ أَحَلَّ ٱللَّهُ لَكَ ۖ تَبْتَغِى مَرْضَاتَ
أَزْوَٰجِكَ ۚ وَٱللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿١﴾

1. Nibiyow maxaad u xarrimi wax Eebe kuu xalaaleeyey si aad u raalli geliso Haweenkaaga, Eebe waa dambi dhaafe naxariista ah.

قَدْ فَرَضَ ٱللَّهُ لَكُمْ تَحِلَّةَ أَيْمَٰنِكُمْ ۚ وَٱللَّهُ مَوْلَىٰكُمْ ۖ
وَهُوَ ٱلْعَلِيمُ ٱلْحَكِيمُ ﴿٢﴾

2. Eebe waa idiin caddeeyey waxa dhaartiinnu ku xalaaloobi, Eebena waa gargaarihiinna,waana wax walba oge falsan.

وَإِذْ أَسَرَّ ٱلنَّبِىُّ إِلَىٰ بَعْضِ أَزْوَٰجِهِۦ حَدِيثًا فَلَمَّا نَبَّأَتْ بِهِۦ
وَأَظْهَرَهُ ٱللَّهُ عَلَيْهِ عَرَّفَ بَعْضَهُۥ وَأَعْرَضَ عَنۢ بَعْضٍ ۖ
فَلَمَّا نَبَّأَهَا بِهِۦ قَالَتْ مَنْ أَنۢبَأَكَ هَٰذَا ۖ
قَالَ نَبَّأَنِىَ ٱلْعَلِيمُ ٱلْخَبِيرُ ﴿٣﴾

3. Ma xusuusan Waqtigii Nabigu ku qarsaday Haweenkiisa Qaarkood hadal, markaas ay ka warrantay xaalkii, Eebana uu Nabiga u daahiriyey, markaas Nabigu uu ogeysiiyey qaarkiis (haweenaydii) qaarna uu ka dhaafay, markuu u warramay ay tiri yaa kuu sheegay xaalkan kuna yiri: waxaa ii warramay Eebaha wax walba oge ah ee yaqaana.

إِن تَتُوبَآ إِلَى ٱللَّهِ فَقَدْ صَغَتْ قُلُوبُكُمَا ۖ وَإِن تَظَٰهَرَا
عَلَيْهِ فَإِنَّ ٱللَّهَ هُوَ مَوْلَىٰهُ وَجِبْرِيلُ وَصَٰلِحُ ٱلْمُؤْمِنِينَ ۖ
وَٱلْمَلَٰٓئِكَةُ بَعْدَ ذَٰلِكَ ظَهِيرٌ ﴿٤﴾

4. Haddaad Eebe u noqotaan inkastoo qalbigiinnu iishay (Eebe wuu idiin dhaafi) haddaadse isu kaalmaysataan Nabiga (dhibkiisa) waxaa u gargaari Eebe, Jibriil iyo kuwa suuban ee Mu‘miniinta ah Malaa‘igta (kalana) markaas ka dib yey xoojin.

5. Wuxuu Eebe u dhawyahay in Nabigu hadduu idin furo (Haweenka Nabiga qaarkood) idiinkuna beddelo kuwa idinka khayr roon oo ah Musliimiin, Mu‘miniin ah adeeca Eebe, Toobad keena, Eeba caabuda,Soomana, kuwa horay loo guursaday iyo kuwo aan hadda ka hor la guursanba leh.

عَسَىٰ رَبُّهُۥٓ إِن طَلَّقَكُنَّ أَن يُبْدِلَهُۥٓ أَزْوَٰجًا خَيْرًا مِّنكُنَّ
مُسْلِمَٰتٍ مُّؤْمِنَٰتٍ قَٰنِتَٰتٍ تَٰٓئِبَٰتٍ عَٰبِدَٰتٍ سَٰٓئِحَٰتٍ
ثَيِّبَٰتٍ وَأَبْكَارًا ٥

**Aayadahanu waxay ku soo degeen mar uu Nabigu (naxariis iyo Nabad gelyo korkiis Eebe ha yeelee) Caano ama Malab uu ka soo dhadhamiyey Guri haweenaydiis, markaas uu kuwa kale qalbigoodu wax galay, Eebana isagaa wax Xalaaleeya waxna xarrima, saas daraadeed yuu nabiga ugu jeediyey arrintaas, tan kale waa inaan la isku kaalmaysan dhib iyo wax yeello ee laysu kaalmaystaa wanaag iyo sama fal, Eebana waa gargaaraha Rasuulkiisa iyo Mu‘miniinta.**
**Masruuqna wuxuu yidhi: Nabiga waxaa la faray inuu Dhaartii ka kafaaroguto. At-Taxriim (1-5).**

---

6. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax ay kana (shaqeeyaan) malaa‘ig adag oo daran oon Eebe ku caasiyeyn wuxuu faro,falana wixii la amro.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ قُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا
ٱلنَّاسُ وَٱلْحِجَارَةُ عَلَيْهَا مَلَٰٓئِكَةٌ غِلَاظٌ شِدَادٌ
لَّا يَعْصُونَ ٱللَّهَ مَآ أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ ٦

7. Kuwa Gaaloobow ha cudur daaranina maanta (Qiyaamada) waxaa laydinka abaal marin uun waxaad camal fali jirteen.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَا تَعْتَذِرُوا۟ ٱلْيَوْمَ إِنَّمَا تُجْزَوْنَ
مَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ٧

8. Kuwa xaqa rumeeyow u toobad keena Eebe toobad san, wuxuu Eebe u dhawyahay inuu asturo xumaantiina, idin geliyana Jannooyin ay dureerayso dhexdooda Wabiyaal, Maalinta uusan Eebe hoojinayn Nabiga iyo kuwa la jooga,nuurkooduna wuxuu socon hortooda iyo midigtooda iyagoo dhihi Eebow noo taam yeel Nuurkanaga noona dambi dhaaf‘adaa wax walba karee.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ تُوبُوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ تَوْبَةً نَّصُوحًا
عَسَىٰ رَبُّكُمْ أَن يُكَفِّرَ عَنكُمْ سَيِّـَٔاتِكُمْ
وَيُدْخِلَكُمْ جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا
ٱلْأَنْهَٰرُ يَوْمَ لَا يُخْزِى ٱللَّهُ ٱلنَّبِىَّ وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟
مَعَهُۥ نُورُهُمْ يَسْعَىٰ بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَٰنِهِمْ
يَقُولُونَ رَبَّنَآ أَتْمِمْ لَنَا نُورَنَا وَٱغْفِرْ لَنَآ
إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ قَدِيرٌ ٨

9. Nabiyow la jihaad gaalada iyo Munaafiqiinta kuna adkow, hoygooduna

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِىُّ جَٰهِدِ ٱلْكُفَّارَ وَٱلْمُنَٰفِقِينَ

waa Jahannamo meel loo ahaadana iyadaa u xune.

وَٱغْلُظْ عَلَيْهِمْ ۚ وَمَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَبِئْسَ ٱلْمَصِيرُ ﴿٩﴾

**Dadka xaqa rumeeyey waa inay Ehelkooda khayrka faraan si ay uga nabad galaan naar dadka iyo dhagaxa lagu huriyo, Malaa‘ig daranna oo amarka Ebe fulisana ay ka shaqayso, si ayna u noqonin sida kuwa xaq diidka ah ee loo dhihi ha cudur daaranina maanta, waana in Eebe toobad dhab ah loogu toobad keeno si uu wanaag iyo dambi dhaaf noogu abaal mariyo maalinta Nabiga iyo intii raacday Eebe u sama fali illeen wax walba isagaa karee, Gaalada iyo Munaafiqiintana waa in lala jahaado si Jidka toosan loo tusiyo.**
**Rasuulkana (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa Ha yeelee) waxaa la warsaday Tawbadda Nasuuxa ah (Toosan) wuxuuna yidhi: Waa in laqoomameeyo Dambiga Markuu kaa dhaco, ood markaas Eebe dambidhaaf warsato, oodan una noqonin. At-Taxriim (6-9).**

---

10. Eebe wuxuu tusaale uga dhigay kuwa Gaaloobay Haweenaydii Nabi Nuux iyo Nabi Luudh, waxaa qabay Laba Addoon oo Eebe oo suusuuban, markaasay khiyaameen Nabiyadaas waxbana ugama ayan tarin Eebe agtiis waxaana loo dhihi Labadaas haweenay la gala naarta kuwa gelaya.

ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا لِّلَّذِينَ كَفَرُوا۟ ٱمْرَأَتَ نُوحٍ
وَٱمْرَأَتَ لُوطٍ ۖ كَانَتَا تَحْتَ عَبْدَيْنِ مِنْ عِبَادِنَا
صَٰلِحَيْنِ فَخَانَتَاهُمَا فَلَمْ يُغْنِيَا عَنْهُمَا مِنَ ٱللَّهِ
شَيْـًٔا وَقِيلَ ٱدْخُلَا ٱلنَّارَ مَعَ ٱلدَّٰخِلِينَ ﴿١٠﴾

11. Waxaa kale oo Eebe Tusaale uga dhigay kuwa rumeeyey Haweenaydii Fircoon markay tidhi Eebbow Guri agtaada iiga dhis jannada dhexdeeda, igana nabad geli Fircoon iyo Camalkiisa,igana nabad geli dadkaas daalimiinta ah.

وَضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا لِّلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱمْرَأَتَ
فِرْعَوْنَ إِذْ قَالَتْ رَبِّ ٱبْنِ لِى عِندَكَ بَيْتًا
فِى ٱلْجَنَّةِ وَنَجِّنِى مِن فِرْعَوْنَ وَعَمَلِهِۦ وَنَجِّنِى
مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١١﴾

12. Maryama bintu cimraanna xusuusta ee isdhawrtay, markaas malagu jeebka ka afuufay, rumaysayna Sharciga Eebe iyo Kutubtiisaba,kana mid noqotay kuwa Eebe adeeca.

وَمَرْيَمَ ٱبْنَتَ عِمْرَٰنَ ٱلَّتِىٓ أَحْصَنَتْ فَرْجَهَا فَنَفَخْنَا
فِيهِ مِن رُّوحِنَا وَصَدَّقَتْ بِكَلِمَٰتِ رَبِّهَا
وَكُتُبِهِۦ وَكَانَتْ مِنَ ٱلْقَٰنِتِينَ ﴿١٢﴾

**Ruux xumaanlaw ah wax uma tarto la nooli dad fiican hadduusan wax qaadanaynin’sida haweenkii Nabi Nuux iyo Nabi Luudh iyo wixii la mid ahaa**
**Sidoo kale ruxii wanaagsan xumaan qof kale wax ma yeesho hadduusan ka raalli ahayn sida haweenaydii fircoon, Maryama Bintu Cimraan oo Nabi Ciise Hooyadiis ahayd Xaalkeeduna la yaabuu lahaa waxayse ku tusin in Eebaha Bini aadamka abuuray uu siduu rabo wax u falo saasna waa in la rumeeyo.**
**Nabiguna wuuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) waxaa kaamil noqday Ragga waxbadan, Haweense waxaa ka kaamil noqday Aasiyadii Fircoon, Maryama Bintu Cimraan, iyo Khadiijo Biintu khuweylid, Fadliga Caa‘isho ee Haweenkana waa sida thariidka iyo cunada kale. (Bukhaari iyo Muslim). At-Taxriim (10-12).**